| broadlawns MEDICAL CENTER | Buuga Tusmada ee Ururka oo dhan: | Maamulka Guud | |
|---|---|---|---|
| DES MOINES, IOWA | Taariikhda Asalka:<br>Dib u eegistii/Muraajacadii ugu Danbaysay: | 06/2019 | Nambarka.: Qabyo Qoraal<br>Bogga 1 |
| MAWDUUCA: | Biilka iyo Soo aruurintiisa | | |

I. Xeerka

Broadlawns Medical Center (BMC) waxay si cadaalad ah oo quman uga dalbanaysaa bukaanada qarashka adeegyada daryeelka caafimaad ee lasiiyay. Dhamaan bukaanada dhaqaale ahaan awooda waa inay bixiyaan qayb kamid ah qarashaadka daryeelkooda caafimaad. Broadlawns Medical Center ayaa qaadaysa talaabooyin lagu aruurinaayo cadadka lacagta lagu leyahay bukaanada lasiiyay adeegyada daryeelka caafimaadka.

II. UJEEDADA

Ujeedada xeerkaan waa in laqeexo qaabab aka ay u adeegsato Broadlawns Medical Center aruurinta qarashaadka lagu leeyahay bukaanada lasiiyay adeegyada caafimaadka, iyo sifooyinka lacagtaas loogasoo qaadaayo marka bukaanadu ay bixin waayaan qaybta laga rabo qarashaadkaas daryeelka caafimaadka. Bukaanada awooda inay qayb kabaxshaan qarashaadka daryeelkooda caafimaadka waxay xaq uleeyihiin inay raadsadaan kaalmada ay heli karaan ee caymiska ayna dhiibaan qayb kamid ah qarashaadka daryeelkooda caafimaad, xarunta Broadlawns Medical Center waxaa waajib kasaaran yahay inay qarashka kaqaado bukaanadaas.

III. QEEXITAANADA

A. **Daryeelka Caafimaad ee Degdega ah:** ida kucad Emergency Medical Treatment and Labor Act (EMTALA, Sharciga Daawaynta Caafimaad iyo Shaqaalaha), waa xaalad caafimaad taasoo leh astaamo kadhigaaya mid aad udaran taasoo hadaan lahelin gurmad caafimaad oo degdeg ah la filaayo si macquul ah inay halis xun oo caafimaad galiso qofka, kureebto naafo kutimaada shaqada, ama hawlgab daran oo kudhaca qayb kamid ah jirka ee bukaanka. Waxaa sidoo kale kujira haweeneey uur leh taasoo xaaad caafimaad ay soo waajahdo.

B. **Isbitaalada** Waxaa kujira labadaba isbitaalka meesha daryeeka caafimaad agu baxshay, iyo sidoo kale xarumo kasta oo wakiil ka ah isbitaakaas si ay usoo aruushaan acagta lagu leeyahay Bukaanka kujira xeerkaan.

C. **Caawimaad Dhaqaale:** Si waafaqsan hanaanka Broadlawns Community Care Program iyo Catastrophic Financial Assistance Policy A-1006, Caawimaada Dhaqaale, noocyada caawimaada (caawimaadaha) lasiyay bukaanka waxaa lagu go'aanshaa in bukaanku yahay qof dhaqaale ahaan danyar ah.

D. **Daryeelka Caafimaad ahaan Muhiimka ah:** Waa adeegyada waafaqsan baaritaanka iyo daawaynta xanuunka bukaanka, si waafaqsan heerarka udagsan shaqada wanaagsan ee caafimaadka, kuwaasoo loo baahan yahay inay haqab tiraan baahida caafimaad ee Bukaanka sababna u ah wax kabaxsan dalabka bukaanka ama dookha dhakhtarka ama daryeelaha bukaanka, ahna nooca adeegga ee ugu qiimo jaban kaasoo si macquul ah ubuuxinaaya baahiyaha Bukaanka.

E. **Extraordinary Collection Actions ("ECAs, Talabooyinka Lacag aruurinta Aan Caadiga ahayn"):** Talaabooyinka lqaado ayadoo wakiil laga yahay BMC oo kadhanka ah Bukaanka si looga qaado qarashaadka biilka daryeelka, hadii ay talaabooyinka noocaas ah axariiraan arimaha soosocda:

   a. Hakinta ama diidmada, ama codsiga bixinta qarashka axariira biilal hore oon adhiibin kahor intaan labixin Daryeelka Caafimaad ee Degdega ah. Xaalad kasta oo jirta looma ogola BMC inay qaado talaabooyin qarash aruursi ah oo caqabad kunoqon kara bixinta Daryeelka Caafimaad ee Degdega ah.

   b. Wax laxariira sharciga ama hananaka garsoorka (tusalayaasha waxaa kamid ah qaadista taaabo madani ah, lawareegida hantida, kajoojinta qofka guri uu kiro kudaganaa, ama jarashada mushaaraadka qofka). Hase yeeshee, xeerkaan kuma jiraan qaybta adeegyada qofka kuwaasoo labaxshay, ama laga yaabo, inuu baxshay qarash bixiyaha koobad ama sadexaad ee qofka sida shirkada caymiska gaariyaasha ama magdhawga shaqaalaha. Sida uu

qabo sharciga Gobalka Iowa, marka Bukaanku adeegyo soo doonto kadib marka uu shil galo ama dhaawacmo, BMC waxay saari kartaa rahmaada isbitaalka oo ah inay qolo sadexaad lacagta bixiso, rahmaaduna maaha ECA.

c. Gudbinta lacag sheegashada kujirta dacwada qof cayr ah maaha ECA.

F. **Macluumaad Kooban oo Luuqad Dabacsan Kuqoran:** Waa dukumiinti faahfaahin kooban kabixinaaya xeerka BMC ee Community Care Program iyo Catastrophic Financial Assistance A-1006.

G. **Cadaynta Biilka ee Kadib Marka qofka laga saaro Isbitaalka:** Cadaynta biilka ee lasiiyo Bukaanka kadib marka bukaanku helay adeegyada daryeelka caafimaadka uuna kabaxo Isbitaalka.

H. **Mudada Codsiga:** Waa mudada kabilaabmaysa taariikhda daryeelka lasiiyay Bukaanka kuna dhamaanaysa kadib (1) 240 maalmin marka lasoo saaro Cadaynta Biilka ee lasoo saaro Kadib Marka isbitaalka Bukaanka laga saaro; (2) mudada loo cayimay e kuqoran ogaysiiska lasiiyay bukaanka sida lagu qeexay Farqada IV.B.a.i ee xerkaan, ama (3) markay dhamaato mudada loo cayimay bixinta macluumaadka dheeriga ah.

IV. HANAANKA

A. Broadlawns Medical Center waxay siinaysaa dookhyo macquul ah Bukaanada samaynaaya dadaalka daacadnimada leh si ay iskaga dhiibaan biilalkooda. Hase yeeshee, BMC waxay kadoonaysaa Bukaanada inay dhiibaan lacagta lagu leeyahay ee lagu siiyay adeegyada daryeelka caafimaadka, waxayna qaadaysaa talaabooyin ay lacagta uga qaadanayso markay muhiim noqoto.

B. BMC maqaadi doonto Talaabooyinka Aan caadiga ahayn ee Lacag Aruurinta oo kadhan ah Bukaanka si ay uga qaado qarashka daryeelka ilaa inay samayso maahee marka hore Dadaalada Macquulka ah ee lagu ogaysiinaayo Bukaanka helitaanka Caawimaad Dhaqaale iyo qaabka uu ucodsanaayo Caawimaad Dhaqaae.

a. Dadaalada Macquulka ah waxaa kamid ah dhamaan talaabooyinka soosocda ee Isbitaalku qaadaayo:

i. Bixinta ogaysiis qoran (iyo iskudayga bixinta ogaysiis afka ah) lana siiyo Bukaanka si loo ogaysiiyo helitaanka Caawimaad DHaqaale, ayadoo lasiinaayo Faahfaahin kooban oo kuqoran Luuqad Dabacsan, taasoo aqoonsanaysa taaabooyinka ECAs ee Isbitaalku qaadi karo hadii loo baahdo, sheegaysana waqtiga ucayiman oo marka lagaaro laqaadi karo talaabooyinka ECAs kaasoo aan kahorayn karin 30 maalmood laga bilaabo kadib taariikhda marka ogaysiiska qoran labaxshay.

ii. Ogaysiinta Bukaanka soo gudbiyay codsiga Caawimaada Dhaqaale oo kala dhiman lana ogaysiinaayo sida uu codsiga qaab sax ah ugu buuxin karo, iyo in lasiiyo bukaanka fursad macquul ah si uu sidaas usameeyo. Isbitaalku waa inuu ogaysiis qoraal ah siiyaa uuna siiyaa macluumaadka lagala xariiraayo ilaha kacaawin kara Bukaanka buuxinta codsiga.

iii. Gaarista go'aanka laxariira uqalmida Caawimaada Dhaqaale hadii Bukaanku so gudbiyo codsiga Caawimaada Dhaqaale oo dhamaystiran inta lagu jiro mudada Loo cayimay Codsiga.

b. Hadii BMC ay hakiso ama diido daryeeka ayadoo ucuskanaysa biilal aan wali labixin oo laxariira daryeel hore, shuruudaha Dadaalada Macquulka ah ayaa kaladuwanaanaaya. BMC waxaa qasab ah iany Bukaanka siiso foomka codsiga ee FAP iyo ogaysiiska qoran ee helitaanka Caawimaad Dhaqaale, ayna sheegto mudada loocayiay soo gudbinta codsiga FAP ee daryeelkii hore. Mudada lacayimay waa inay kahormarin 30 maalmood kadib taariikhda ogaysiiska qoran labaxshay ama 240 maalood kadib taariikhda Cadaynta Biilka ee labaxsho Kadib Isbitaal Kabixida ee laxariira daryeelkii

horay oo baxshay. Hadii codsiga FAP oo buuxa lasoo gudbiyo mudooyinkaan loo cayimay gudahood, markaas BMC waa inay kashaqaysaa codsiga sidii loogu talagalay.

C. BMC iskuma dayi doonto inay lawareegto hantida Bukaanka kuwaasoo aan kareebanayn qarash aruurinta sida kucad sharciyada gobalka ama kuwa federaalka.

D. Hadii bukaanku gudbiyo codisga Caawimaada Dhaqaale oo buuxa BMC na ay aaminsan tahay in Bukaanku uu xaq uyeelan karo Medicaid, BMC waxay dib udhigi kartaa gaarista go'aanka uqalmida caawimaada ilaa kadib marka Bukaanku codsado Medicaid go'aana laga gaaray uqalmida noocaas ah ee Medicaid.

E. Hadii uqalmida bukaanka ee caawimaada dhaqaale aan wali lago'aamin, markaas BMC waxay kajoogsanaysaa qaadista Talaabooyinka aan Caadiga ahayn ee Lacag Aruurinta muddo 100 maalmood ah laga bilaabo taariikhda ay soo baxdo Cadaynta Bukaanka ee Biilka Kadib Markuu Isbitaalka Kabaxo, oo lagu daray waqti kasta oo dheeri ah oo cayimnaa kaasoo lagu siiyay bukaanka ogaysiiska kuqeexan Farqada IV.B.a.i ee xeerkaan.

   a. Hadii bukaanku gudbiyo codsiga buuxa ee Caawimaada Dhaqaale xili kasta oo kaid ah Mudada Ucayiman Codsiga, markaas waxaa qasab ah in Isbitaalku joojiyo talaabo kasta oo ECAs ah, uuna go'aan kagaaro uqalmida bukaanka ee Caawimaada Dhaqaale, kadibna uu usheego bukaanka inuu heli karo iyo inkale Caawimaad Dhaqaale.

      i. Hadii Bukaanku xaq uyeesho Caawimaad Dhaqaale laakiin uusan xaq uyeelan daryeel bilaash ah, markaas waxaa qasab ah in Isbitaalku bukaanka siiyo cadaynta oo sheegaysa cadadka lacagta lagu leeyahay bukaanka.

      ii. Hadii bukaanku uqalmo Caawimaad Dhaqaale, Isbitaalku waa inuu kalaabtaa talaabooyinkii uu horay ubilaabay ee ECAs.

   b. Hadii bukaanku soo gudbiyo codsiga Caawimaada Dhaqaae oo kala dhiman mudada Codsiga Loo ciyamay, waa in Isbitaalku joojiyo talaabada ECAs iaa Bukaanku kadhamaystiraayo codsiga Caawimaada Dhaqaalaha isbitaalkuna waa inuu go'aan kagaaro in Bukaanku uqalmo iyo inkale Caawimaad Dhaqaale, AMA iaa bukaanku kuguul daraysto keenista macluumaad dheri ah gudaha mudada kama danbaysta ah ee 240 maalmood ah laga bilaabo taariikhda lasoo saaro Cadaynta Koobaad ee Biilka Lagu leeyahay Bukaanka kadib Markuu Isbitaalka kabaxo, mudada cayiman ee bukaanka lagu siiyay ogaysska kuqeexan Farqada IV.B.a.i ee xeerkaan, iyo taariikhda ucayiman in looga jawaabo go'aanka iskacad ee uqalmid la'aanta Caawimaad Dhaqaale.

   c. Isbitaalka ayaa bilaabi kara ECAs hadii Bukaanku uuna soo gudbin codsiga Caawimaada Dhaqaale oo buuxa mudada 240 maalmood ah laga bilaabo taariikhda koobaad ee Cadaynta Biilka Bukaanka Isbitaalka Markuu Kabaxo Kadib iyo hadii shuruudaha ogaysiiska labuuxshay.

F. Bukaanada helay qaybaha kaladuwan ee daryeelka BMC, Isbitalaka ayaa buuxin kara shuruudaha kuqoran xeerkaan si isdaba joog ah. Hadii MBC ay iskudarto qarashaadka lagu eeyahay Bukaanak ee daryeelada badan ee lasiiyay, kama qaadi karto talaabooyinka ECA ilaa kadib marka Mudada Ucayiman Codsida daryeelkii ugu danbeeyay ladhaafo.

Waxaa Ansixiyay Gudigga Agaasimayaasha bishii Juun 18, 2019

____________________________________

Jody Jenner, Madaxa Waaxda Fulinta